

Wargeeska Badqabka Nadiifiyeyaasha

Deyrta 2024

Horumarka Xisaabiyaha:

Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqno in xisaabiyaha culeyska shaqada iyo hagaha adeegsadhaha ayaa hadda laga heli karaa oo laga soo degsan karaa [mareegtadeenna](#). Waxaad xor u tahay in aad wadaagto linkiga! Haddii aad adeegsanaysay Xisaabiyaha Culeyska Shaqada – fadlan [noo soo dir](#) fikrado ama faallooyin kasta ee ku saabsan qalabka iyo sida aan u fududeyn karno adeegsiisa.

Shuruudaha Nidaamka:

Xisaabiyaha Culeyska Shaqada ee Shaqaalaha Nadaafadda ayaa la diyaariyay iyadoo la adeegsanayo MS Excel. Barnaamijka wuxuu u jiraa qaab beta (oo tijaabo ah), sidaa daraadeed, si buuxda uma taageeri karno ama uma filan karno arrimaha tiknoolajiyadda adeegsadhaha. Nuqulka hadda la soo daayey wuxuu sida ugu wanaagsan ugu shaqeeya aaladaha ku shaqeeya barnaamijka Microsoft Windows oo ma taageero aaladaha Mac devices ama in telefoonka gacanta lagu adeegsado. Waxaan hadda ka shaqeynaynaa diyaarinta nuqulka mareegtada(web) ah ee xisaabiyaha.


Tababbarka:

In kastoo barnaamijka iyo hagaha adeegsadhaha la heli karo si loo soo dejiyo, haddii aad u baahan tahay kaalmo dheeraad ah oo xagga adeegsiga xisaabiyaha ah ama in lagu la dulmaro barnaamijka iyo hagaha – fadlan [nala soo xirii](#). Waxaa laga yaabaa in aan awoodno bixinta tababbarka ka dhaca internet-ka ama mid qof ahaan ah.

Iftiiminta Khatarta: Bedqabka Qalabka Nadiifinta ee Vacuum

Hawsha guud ee shaqaalaha nadaafadda iyo xirfadlayaasha kale ee nadaafadda ka shaqeeya ayaa adeegsada qalabka vacuum-ka – haddii uu yahay midka taagan ama midka boorsada dhabarka la saarto oo kale ahba. Qalabka vacuum-ka wuxuu noqon karaa mid culus oo ay adag tahay in si ammaan ah loo adeegsado, gaar ahaan goobaha ciriirriga ah ama marka loo kala gudbayo dabaqyada. Haddii aad ogtahay sida ay dhaawacyadan u dhacaan, waxaa ay kaa caawin karaan in aad qaado tallaabooyin aad si ammaan ah ugu shaqeynayso.

Qaybaha guud ee jirka ee soogaara dhaawacyada vacuum-ka:



Tan iyo 1-dii Luulyo, 2019, waxaa jiray 208 xaq-sheegasho la soo gudbiyay oo ay ku lug lahaayeen shaqaalaha nadaafadda ee vacuum-ka. Boqolkiiba sodon (30%) ee kuwan waxaa loo kala-soocay in ay yihiin xanuunnada murqaha iyo lafaha iyadoo boqolkiiba shan-iyo-labaatanna (25%) ay ku lug leeyihiin dadaal badan (min qaadis, jiidis, ama riixid, tusaale ahaan). Boqolkiiba kow-iyo-labaatan (21%) waxaa ay ku lug lahaayeen nooc kufid ah – (isla meeshaasi ama jaranjarooyinka). Shaqaalaha nadaafadda ayaa sidoo kale soo sheegay in ay gubeen ama ay ka naxeen qalabka nadaafadda ee vacuum-ka. In kastoo qaybaha jirka¹ caamka ah ee soogaara dhaawacyada vacuum-ka ay ahaayeen dhabarka iyo addimada hoose (lugaha iyo cagaha), waxaa jiray xaqsheegashooyinka dhaawacyada ee jirka oo dhan.

Ka digtoonow degaanka aad ka shaqeynayso – gaar ahaan marka qalabka vacuum-ka lagu nadiifinayo jaranjarooyinka ama agagaarkooda, iyo marka la qaadayo alaabta guriga ama walxaha kale. Tilmaan meelaha xargaha leh ama ka jira khataraha kale ee kufidda. Eeg xaaladda qalabka, oo kormeerahaaga u soo sheeg xargaha korontada ee go'an ama qalabka sida liidata loo dayactiray. Nasasho qaado ama kala beddel hawlaha hadba sida loogu baahdo si aad u nasiso murqahaaga iyo jirkaaga.

¹ Xeeraynta xaq-sheegashada ee sifooyinka dhaawaca ee loogu talagalay magdhowga dhaawacyada shaqaalaha ayaa u kala duwan Sanduuqa Gobolka/(SF) iyo Is-Cayminta/Self-Insured (SI), falanqeyntan ayaa loo adeegsadaa labada nidaam waxaanna loo kooxeeyaa koodhadhka isku midka ah. Boqolkiiba soddon-iyo-afar (34%) ee xaq-sheegashooyinkan ma lahan macluumaad ku filan oo lagu kala sooco.